Xuquuqda Ardayda

# Diinta iyo Ku Dhaqanka Diinta

Sharciyada xuquuqda madaniga waxay ka mamnuucayaan takoorka iyo kadeedka takoorka ku saleysan diinta dugsiyada dadweynaha K-12.

> **Takoorka** waa sida aan xaqa ahayn ama sinaan la'aanta loola dhaqmo ama loo kadeedo qof ama koox maxaa yeelay waxay qeyb ka yahiin koox la tilmaamay, oo loo yaqaan dabaqadda la badbaadiyo. **Diinta iyo caqiidada** waa dabaqaad la badbaadiyo sida hoos timaado sharciga Washington.[1]
>
> **Kadeedka takoorka** waa kadeedka ku saleysan **dabaqadda la badbaadiyo**. Waxay qaadan kartaa qaabab badan, sida cago jugleynta, caayda, kaftanka yasniinka, weerarka, ama dabeecad kale sida cago jugelynta, waxyeelada, ama yasniinka.

## Ka Badbaadinta Takoorka ku Saleysan Diinta

Dugsiyada dadweynaha waa inay ka ilaaliyaan ardayda takoorka iyo dhibaateynta diinta ku saleysan, oo ay ku jiraan takoorka iyo dhibaateynta ku saleysan asal diimeedka ardayga, caqiidadooda, labiskooda, iyo sida ay isu muujiyaan. Diinta iyo caqiidada waa kooxo si sharci ah loo ilaaliyo marka loo eego sharciga Washington

**Fududeynta Diinta**

Wax ka beddelka Koowaad ee Dastuurka Mareykanka wuxuu mamnuucayaa in dowladda ay samayso ama taageerto diin gaar ah, wuxuuna ilaaliyaa ku dhaqanka diinta iyo muujinta diinta faragelin aan loo baahnayn iyo takoor ka imanaya dowladda.

Dugsiyada dadweynaha waa in ay qaadaan talaabo macquul ah si ay ardayga ugu fududeyaan diinta uu aaminsan yahay ama dhaqamada, haddii fududeyntaas aysan abuurin dhibaato dheeraad ah. Dhibaatada aan lagu talogelin waa eray loola jeedo in fududeynta tahay qaali, mija xaabiso ammaanka, ama farageliso xuquuqda ardayda kale ama shaqaalaha.

Fududeynta diinta waxaa ka mid noqon kara:

- Ogolaashada fasaxyada munaasabadaha diinta iyo hawlaha
- In la bixiyo hawlo kale oo qaba ujeedooyin la mid ah xagga waxbarashada
- Ka dhaafidda xeerka labbiska ama sharuudaha labbiska iskuulka qilaafsan diinta uu aaminsan yahay ardayga ma dhaqankiisa. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in dugsiga ka tanaasulo sharciga u ogolaada ardayga in uu soo qaato daboolka madaxa, dahab, shay la xariira diinta, gar, ama tin ilaa heer dheer.

**Waqti la sii daayay oo loogu talagalay waxbarashada diinta (RTRI)**

Bulshooyinka qaarkood, ardaydu waxay leeyihiin ikhtiyaar ay kaga qayb qaadan karaan Waqti la sii daayay oo loogu talagalay waxbarashada diinta (Released Time for Religious Instruction, RTRI). Go'aanka ka-qaybgalka waxaa lagu gaaraa heer deegaan, iyadoo la waafajinayo siyaasadaha degmooyinka dugsiyada ee deegaanka.

Degmooyinka dugsiyadu waa loo oggol yahay, balse khasab kuma aha, inay u oggolaadaan ardayda inay ka qayb qaataan barnaamijyada RTRI. Inkastoo barnaamijyadani badanaa dhacaan inta lagu jiro saacadaha dugsiga, waxay qabsoomaan waqti aan waxbarasho ahayn; waxay ka

[1] Cutubka 28A.642 RCW, http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=28A.642. Cutubka 28A.640 RCW, http://apps.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=28A.640. Cutubka 49.60 RCW, http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=49.60.

dhacaan meel ka baxsan dhulka dugsiga; waxay u baahan yihiin oggolaanshaha waalidka si ardaygu uga baxo dugsiga (iyadoo ay kormeeraan dad kale oo waaweyn); mana helaan maalgelin dugsi. Degmooyinka dugsiyadu waa inay raacaan siyaasadooda deegaanka ee ku saabsan xaadiritaanka ardayda iyo ka saarista ama fasaxa ardayda dugsiga.

Inkastoo degmooyinka dugsiyadu aanay takoori karin iyadoo lagu salaynayo diinta, haddana khasab kuma aha inay hubiyaan in ururrada waqtiga fasaxa ay helaan fursad ay kula xiriiraan ardayda.

Haddii qof uu aaminsan yahay in dugsiyada ay ka dhacayaan dhibaateyn ama takoor ku salaysan diinta oo la xiriira barnaamijyada RTRI—tusaale ahaan, cagajuglayn la xiriirta ka-qaybgalka ama ka-qaybgal la'aanta ardayga ee barnaamijka—wuxuu gudbin karaa cabasho uu u diro degmadiisa dugsiga. Macluumaad ku saabsan habkan waxaa laga heli karaa bogga (Office of Superintendent of Public Instruction**,** OSPI) ee Complaints & Concerns about Discrimination

## Dhibaateyn Takoor ah oo ku saleysan Diinta

Kadeedka ku saleysan diinta waa qaab takoor laga mamnuucay dugsiyada Washington. Dugsiyada waa in ay qaadaan talaabooyin oo ardayda looga badbaadiyo kadeedka takoorka.

Shaqaalaha dugsiga waa in ay baaraan kadeedka takoorka suurtogalka ah - isla marka ay ogadaan, ama ay ogaan karaan - xattaa haddii waalidka ama ardayga uusan soo gudbinin ashtako rasmi ah.

Haddii baaritaanka muujiyo in dabeecadda kadeedka abuurtay jawi ku dhisan cadaawad, shaqaalaha waa in ay dhakhso joojiyaan dabeecadda iyo soo af jaraan jawiga ku dhisan cadaawadda.

Dugsiga waa in uu:

1. Wax ka qabto waxyeelada kadeedka takoorka ku yeeshay ardayga inta uu ku sugnaa dugsiga, **IYO**
2. Hubsado in dabeecadda takoorka aysan mar kale dhicin.

Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan kadeedka takoorka, tilmaamaha siyaasadda dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariira ka heli kartaa www.k12.wa.us/Equity.

## Ku Dhaqanka Diinta Xiliga Iskuulka

Baddalaadda Kowaad (First Amendment) ee Dastuurka Mareykanka waxay badbaadisaa xuquuqda ardayga u leeyahay xoriyadda diinta iyo xoriyadda hadalka.

Ardayda doorata in ay soo jeediyaan diintooda inta ay ku sugan yahiin dugsiga, waa loo ogol yahay in ay:

- Sheegaan waxyaabaha ay aaminsan yihiin inta ay joogaan dugsiga, shaqada guriga, iyo hawsha dugsiga
- Tukadaan ama aqristaan qoraalada diintooda muddada, qadada, iyo waqtiga kale ee aan waxba la baranin, sida dugsiga ka hor ama kaddib.

# Diinta iyo Ku Dhaqanka Diinta

- Tukadaan ama kala xaajoodaan diinta ardayda kale waqtiga maalinta dugsiga isla sida ardayda ay wada hadalo ula galaan ardayda kale, haddii aysan carqaladeynin iyo aysan faragelinin xuquuqda ardayda kale

## Fasaxyada Diimeed ee Caamka ah

Arday badan ayaa ka maqnaada dugsiga iyo dhacdooyin muhiim ah oo dugsi si ay u ixtiraamaan caadooyinkooda diimeed. Sababtaas awgeed, OSPI waxay ku dhiirrigelisaa degmooyinka dugsiyada inaysan jadwalin dhacdooyin waaweyn oo dugsi maalmaha ciidaha diimeed ee waaweyn. Dugsiyada qorsheeya iyagoo tixgelinaya ciidaha diimeed ee waaweyn waxay muujinayaan dhammaan ardayda in ay yihiin qayb muhiim ah oo ka mid ah bulshadooda dugsiga, isla markaana ay caadooyinkooda diimeed qiimo leeyihiin.

Jadwalada Fasaxyada Diimeed iyo Kuwa Dadweynaha ee Caamka ah

## Baridda ku saabsan Diinta

Dastuurka Mareykanka wuxuu dugsiyada dadweynaha ka mamnuucay in ay hal diin ka aqoonsadaan ama ka jecladaan diin kale iyo in ay diin ka jecladaan kuwa aan diin haysanin.

**Dhexdhexaad. Ujeedada. Miisaaman.**
Dugsiyada dadweynaha waxaa loo ogol yahay in ay ardayda baraan diimaha dunida ilaa inta tababarkaan u adeego ujeedada waxbarashada, sida kaalinta diinta ka qaadato taariikhda iyo bulshada. Macalimiinta waa in ay qoraalka u soo bandhigaan si dhexdhexaad ah, xaqiiqada, oo miisaaman.

Guud ahaan, dugsiyada dadweynaha waxaa loo ogol yahay in ay isticmaalaan muusiko, fan, drama, ama suugaanta la xariira fikradaha diinta. Tusaale ahaan, ardayda waxay dhageysan karaan muusikada diinta sida qeyb ka tirsan daraasadda aqoonta muusikada iyo taariikhda muusikada. Hase ahatee, dugsiyada waa in aysan adeegsanin muusikada noocaas si ay u horumariyaan diinta.

Dugsiyada dadweynaha waa in aysan ku adkeysanin ama horumarinin caqiidada diinta. Lama ogola shaqaalaha dugsiga dadweynaha, sida tababarada, si ay u hoggaamiyaan ducada ama si ay ardayga ugu dhiirigeliyaan ducada. Shaqaalaha dugsiga waa in aysan dhiirigelinin ama ardayda ku casumin in ay ka qeybgalaan, ama ka hor istaagaan, hawlaha diinta.

## Xallinta Dhibatooyinka ama Qilaafaadka

Wada hadalka lala yeesho maamulaha dugsiga, ama iskuduwaha u hoggaansamida xuquuqda madaniga ee dugsiga dagmada, badanaa waa talaabada kowaad oo looga hadlo arrimahaada ama qilaafaadkaada ku saabsan takoorka, iyo xalka dhibaatada.

- **Ahamiyadda sii xaqiiqada** la xariirta takoorka iyo kadeedka, sida aad u fahamsan tahay, IYO
- Ogeysii maamulaha ama iskuduwaha **waxa aad rabtid in ay sameyaan si ay u xalliyaan dhibaatadaas**

Xuquuqda Ardayda

# Diinta iyo Ku Dhaqanka Diinta

Waxaad macluumaadka lagala xariiro iskuduwaha u hoggaansamida xuquuqda madaniga ka heli kartaa halkaan, www.k12.wa.us/Equity/ContactList.aspx. Waxaad kaloo fursad u haysataa in aad soo gudbisid ashtako rasmi ah.

## Ashtakooyinka Rasmiga - Takoorka iyo Kadeedka Takoorka

Haddii ay kula tahay in cunugaada uu la kulmo takoor ama kadeedka takoorka, waxaad soo gudbin kartaa ashtako rasmi ah.

- Bogga Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga, www.k12.wa.us/Equity/Families, waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida loo gudbiyo ashtako rasmi ah iyo sida loo raaco talaabadaha.
- Kala xariir U.S. Waaxda Waxbarashada (Department of Education), Xafiiska Xuquuqda Aadanaha (Office for Civil Rights), telefoonka 206-607-1600 (TDD: 1-800-877-8339), ama booqo bogga internetka, www.ed.gov/ocr.
- Kala xariir Guddiga Xuquuqda Aadanaha Gobolka Washington (Washington State Human Rights Commission), telefoonka 1-800-233-3247 (TTY: 1-800-300-7525), ama booqo bogga internetka, www.hum.wa.gov.

## Ka baro in badan. Weydii su'aalo. Raadso kaalmo.

**Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga (Equity and Civil Rights Office) ee Xafiiska Agaasimaha Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction)**
360-725-6162 | TTY: 360-664-3631 | equity@k12.wa.us | www.k12.wa.us/equity

**Si aad u heshid Iskuduwaha u Hoggaansamida Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Compliance Coordinator) ee ku yaal dagmadaada, booqo:**
www.k12.wa.us/Equity/ContactList.aspx

## Tilmaamaha Federaalka

Tilmaamaha ku saabsan Salaadda iyo Muujinta Diinta ee ay Dastuurku Ilaaliyo ee Dugsiyada Dadweynaha ee Heerka Hoose iyo Dhexes (Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka)

Salaadda iyo Muujinta Diinta ee Dugsiyada Dadweynaha: Su'aalaha Badan La Isweydiiyo: (Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka)

Asal Wadaag ama Astaamaha Qowmiyadda (Office for Civil Rights, OCR)

Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan takoorka iyo kadeedka, tilmaamaha siyaasadda dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariiro, ka heli kartaa www.k12.wa.us/Equity.

Warqadaan waxay soo taxday xuquuqda iyo mas'uuliyadda sida hoos timaado sharciyada xuquuqda madaniga gobolka iyo federaalka. Waxaa dhici karto in aad yeelatid xuquuq dheeraad ah sida hoos timaado sharciyada kale. Ujeedada macluumaadkaan waa wargelin oo keliya - ma ay bixinayaan tallo sharci ah. Wixii talooyin sharciga oo u qaasa daruuftaada xaalada shakhsinimo, fadlan kala xariir qareen.

OSPI ayaa u siisa marin siman dhamaan barnaamijyada iyo adeegyada iyada oo aan ku saleysnayn dheddig/lab ahaan, sinji, caqiido, diin, midab, asal waddan, da'da, kuwa si sharaf leh looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada, Dookh Isku-tag, oo ka mid yihiin muujinta ama isku-aragga lab/dheddig, jiritaan kasta oo naafanimo dareen dhimir ama jirka ah, ama isticmaalka hage ey tababbaran ama u adeegga xayawaanka ee qofka naafanim,ada qaba. Su'aalaha iyo cabashooyinka taakoorka la sheeganayo ayaa lagu hagaajin karaa the Equity and Civil Rights Director, (360) 725-6162 or P.O. Box 47200; Olympia, WA 98504.